Dhismaha HannaanDawladnimo ee Federalka ah,

Ayadoo loo maraayo Wadahadalka Maamullada Hoose.

Howlgal lagu qiimaynaayo Shabeelada Dhaxe.

28 July-15 September 2015

WARBIXINTII HOWLGALKA

Baare: Abdi Noor Mohamed

Ku saleysan Qiiymaynta Gobollada oo aay fuliyeen:

Abdi Noor Mohamed, Umusacdo Bashir Nour, Abdihamid Hassan Wehlie, Ali Mohamed Yusuf, Abdirisaq Omar Bod, Sharif Abukar Ahmad

Waxaa kale oo howlgalgaan caawiyay:

Christoph Jaeger iyo Janel B. Galvanek

Waxaa Turjumay: Abdirashid Adan Mohamud

Mashruuca

Dastuurka ku meelgaarka ah ee uu Barlamaanka Soomaaliyeed 1 August 2012 ansexiyay, ayaa wuxuu Dhidibada u aasay sameynta Dawlad Federal ah. Sida ku xusan qodobka 49 (6) ee Dastuurka Soomaaliyeed "ugu yaraan laba gobol iyo ka badan ayaa ku midoobi kara Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyaga xor u ah go'aankooda". Waxaan cadayn, keebaa bilaabayo "goàankan ikhtiyaariga ah". Sadex DawladGoboleed ayaa dhisnaa kahor intaanay hayàdaan Berghof Foundation ku talaaboqaadinmashruucaan loo bixiyay "Dismaha Federaal ayadoo loo maraayo wadahadalka Maamulada Hoose", oo aay Dawlada Federaalka ah ee Jarmalka Wasaaradiisa Arimaha Dibadda bishii March 2015 ansaxisay. Dawlad Goboleedyadaas waxaay kala yihiin: 1. DawladGoboleedka Jubaland (2013) oo ka kooban gobollada: Gedo, Jubada-Hoose iyo Jubada-Dhaxe. 2.Dawlad Goboleedka Koonfur-Bari Soomaaliya (2015) oo ka koobangobollada Bay, Bakool iyo Shabeelada-Hoose. 3. Waxaa intaasi raacsan Dawlad Goboleedka Puntland (sida rasmiga ah: *Dawlada Puntland ee Soomaaliya),* taasoo sanadkii 1998 ku dhawaaqday inay tahay Dawlad Goboleed Soomaaliyeed oo leh Maamul Hooseed madax banaan. Guddigi Xudduudaha iyo Arimaha Federaalka ee uu Dastuutka ugu tiragalay in uu qayb libaax ka qaato dhamaystirka geedisocodka ku aadan sidii Maamulladaan ku meelgaarka ah aay ugu xuubsiiban lahaayeen Dawlad Goboleedya rasmi ah weli lama magacaabin.

Ayadoo la eegaayo isku biiriddaan ayaa hayàdda Berghof Foundation waxaay qorsheysay inay Shabeelada-Dhaxe (SDH) diiradda saarto, arimaha soo socdo aawgood: Ugu horeyntii wuxuu ka mid yahay Gobollada yar ee aan weli kuwo kale isku biirin (ee aan Dawlad-Goboleed samaysan) sida uu Dastuurka qodobkiisa 49 (9) dhigaayo. Tan labaad, sida ku xusan warbixinta maalinlaha ah ee aay qortay hayàdda aan dowliga ahayn ee la yiraahdo

NGO Safety Programme (NSP)[1], gobalkaani waa kan inti muddo fog ah dhacdooyinka ugu yar ee aamaandaro laga soo sheegay. Muddo gaaban kadib markuu mashruucaan dhaqangalay, ayaay gobollada Galgaduud iyo Mudug isku darsameen si aay u sameystaan Dawlad Goboleed aay Dhuusamareeb magaalo madax u tahay.

Isku soo duuduuboo, isku daygii horudhaca ahaa ee dhismaha Qaran Federaal ah oo ku saleysan in "ayadoon lais qasbeynin" Gobol kalo lagu biiro, shacabki intiisi badnayd lagama qaybgelinin. Waxaa un isku koobay in yar oo ka mid ah dabaqadda sare. Waxaase haboonayd in geedisocodka dhismaha qaranka uu mujtamaca illaa kiisa uga hooseeyo, oo sidoo kale dagmooyinka iyo tuulooyinkaba aay ka qeyb qaataan. Habkaasi ayuu suurtagal ku noqonayaa dhismaha unugyada uu ka koobanyahay qaranka Federaalka Soomaaliyeed-waxaan ula jeednaaDawlad-Goboleedyada xubnaha ka ah-. Kooxda Berghof Foundation waxaay xiriir wanaagsan la yeelatay Guddiga Xudduudaha iyo Federaalka (GXF) ayadoo rajayneyso in laga faaìdeysto aragtida mashruucaani halkudhagiisu yahay, *HOOS HA LAGASOO BILAABO.* Habkaani wuxuu qeyb ka qaadan karaa inuu jideeyo manhaj ku dayasho mudanoo ah: sida ugu haboon ee aay suurtagal u noqon karto in la tixgeloyo codka shacabka ku nool gobollada kale ee isku biiray ayadoon dadyowgi ku noolaa talada waxbo laga siinin.

Shabeelada Dhaxe-Aragtida dadka kale

Warbixin lagu magacaabay "*Shabeelada Dhaxewuxuu u baahanyahay qiimeyn 2015"* oo uu MaamulkaSDH bishii lixaad ee sanadkaan shaaciyay, ayaa si lixaad leh inooga caawisay mowdhuuca aan ka hadleyno, kahor intaanan soo bandhigin qiiymayntaani aay hayàdda Berghof Foundationgobolka kasoo saartay. Warbixintu waxaay ku nuuxnuuxsatay si Soomaaliya aay "usoo kabsato horumarna u gaarto, waa in SDH aay geedi-socodka hormuud ka noqotaa". Maxaa yeelay, waxaay kow ka tahay gobollada wax soo saarka beeraha iyo kheyraadka dabiiciga ah hodanka u ah. SDH waxaay awooddaa inaay quudiso wadanka intiisa badan, qeyb lixaad lehna ka qaadato kobaca dhoofinta iyo soo xareyntacanshooraha.[2]

Dadka Gobolka dagan waxaa lagu qiyaasaa 1,676,324. Boqolkiba sideetan oo dadkaasi ka mid ah miyiga ayaay ku noolyihiin. SDH waxaay ka koobantahay 8 degmo: Jowhar, Mahadaay, Cadale, Adan Yabaal, Balcad, Warsheekh, Raage Ceele[3] iyo Run-Nirgood.Fursadaha wax soo saarka lixaadka leh ee Gobolka (xaga beeraha iyo kaluumeysiga)[4] ayaa waxaa u sabab ah: 1. Asagoo bad weynta Hindiya caasha ku hayo. 2. Wabiga Shabeele oo dhex maro. Si kastaba ha ahaatee, digaalada sokeeye dhaawac weyn ayaay Gobolka soo gaarsiiyeen asgoo lumiyay wax soo saarkii iyo kaabayaashi dhaqaalaha oo aay ka mid ahaayeenwarshaddi qasabka sonkorta ee Jowhar, warshadihii dharka ee Balcad iyo xirfaddii kaluumeysiga Cadale.[5]

Wakhtigaan xaadhirka ah, Dawlada Dhaxe iyo Maamulka SDH waxaay si is daba joog ah u hanteen gacan ku haynta degaanka intiisa badan. Hadda ayaay haboontahay inla

[1] NGO Safety Program waa barnaamij aay Hayàdo sameyeen oo loola jeedo in Hayàdaha Soomaaliya ka howlgalaayo "loogu deeqo taageero wax ku ool ah iyo foojignaan ku aadan xagga nabadgelyada".http://www.nspsomalia.org/joomla/

[2] "Middle Shabelle Regional Needs Assessment 2015"report issued by the Administration ofthe Middle Shabelle Region, Office of the Governor, 30 June 2015, p. 1.

[3] Raage Elle waa magaalo uu Maamulka Deegaanku doonaayo in uu degmo ka dhigo laakiin aanay weli Dawlada Dhaxe si resmi ah u baasmareynin. Sidaa aawadeed, Kooxda Qiimeynta ee Berghof Foundation ma aaysan booqanin.

[4] "Middle Shabelle Regional Needs Assessment 2015" report, p. 1.

[5] Marjici hore., p. 2.

bilaaboxasilinta, dib u soo kabashada, horumarinta Gobolka iyo dadka ku nool[6].Ayadoo 2013 lagu qiyaasay in 50% deegaanka SDH aay al-Shabaab[7] ka talinayeen, maanta degmada Adan Yabaal iyo Run-Nirgood unbaa gacantooda ku soo haray.

Qolada deegaanka u badan waa Abgaal (Hawiye), inkastooy badnaantaasi jirto, hadana deegaanka waxaa ragaadiyay"dagaalbeeleed qotto dheer oo gobolka faqiirteyay, taasoo waliba horseeday loollan xukunka ah oo Abgaalka kala qeybiyay. Labada beelood ee (Abgaalka) ugu waaweyn waa Wacbuudhan (oo usii kala baxa Galmaax iyo Daud) iyo Harti Abgaal (oo u sii kala baxa Agoonyar iyo Warsangali). Beelaha kale ee gobolka degan waxaa ka mid ah Gaaljecel, Jareer, Shiidle, Xawaadle, Mubliin, Hilibi iyo qabiilooyinka kale oo yar yar oo asalkoodu Carab yahay."[8]

Khilaafyada ka dhexdhaca bulshada ku nool SDH waxaa guud ahaan sababa dhaqaalaha xadidan, maadaamo aay adeegyadiiassasiga ahaa intooda badan Gobolka ka maqanyihiin.Intaas waxaa sii dheer, ayadoo uu jiro tartan siyaasadeed oo ku aadan qofkii Gobolka maamulilahaa.Taariikh ahaan, hadba qabiilkii hanto gacan ku haynta Jowhar ayaa sidoo kale Gobolka oo dhan xukumi jiray. Wakhtigaan, waxaa awoodda degmooyinka dhawaantaan la xureyay ee Jowhar iyo Balcad qaybsaday beelaha Abgaal. Hase yeeshee waxaan cadayn, sida isu dheeli tirkasii awood qeybsiga uu u saameyndoono Jilibyadahoose ee Abgaalka, markii degmooyinkaaay al-Shabaab welihaystaan gacanta lagu soo dhigo.[9]

Bartamihii April 2015 ayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka (WAGF)waxaay dirtay ergowadatay barnaamij wacyigalin ah oo lagu magacaabay "Middle Shabelle Wadajir Outreach Programme" uu hogaaminaayay Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda, Cabdirashiid Mohamed Xidig si uu Gobolkausoo indha indeeyo. Barnaamijkaasi wacyigelinta ahwuxuu ka koobnaa, koox farsamo oo ka tirsan WAGF, xubno ka tirsan Guddi-Hoosaadka Guddiga Arimaha Gudaha ee Barlamaanka Soomaaliyeed, xubno ka tirsan Guddiga Dib u Heshiisiinta, Xildhibaano deegaanka ka soo jeedo iyo qaar kale oo SDH daneeyo. Isu geynti, 50 ergayiyo sodon ilaaladooda ah ayaa gobolka u safray.[10]

Ayadoo lagu salaynaayo natiijadiiergadii WAGF aay dadka deegaanka ka soo uruuriyeen, ayaa talooyinkaan hoos ku xusan lasoo saaray:

- "Anagoo ah Dawladda Federaal Soomaaliyeed iyo Daneeyayaasha caalamiga ah, waxaan u baahannahay in sharaxaada Juquraafi ee Barnaamijka Xasilinta aan Degmooyinka oo dhan ku baahino.
- Waa in aay hay`ado kala duduwan fulinta mashruucaani ka qeybqaataan.
- Waa inay WAGFbilawdo horseedna ka noqoto dib uheshiisiin iyo wada-hadalka mujtamaca; oo aay sare u qaadaa wacyigelinta bulshada ee ku aadan (fahanka) Federaalka, oo aay taageertaa Demoqraaddiyad illaa heer Dagmo.

[6] Marjici hore, p. 2.
[7] SOMALI CEWERU Conflict Early Warning Early Response Unit, draft report *From the bottom-up: Perspectives through Conflict Analysis and Key Political Actors' Mapping for the Central Regions of Hiran, Galgaduud, and Middle Shabelle*, February 2013, p. 42.
[8] Marjici hore., p. 39.
[9] SOMALI CEWERU Conflict Early Warning Early Response Unit, draft report *From the bottom-up: Perspectives through Conflict Analysis and Key Political Actors' Mapping for the Central Regions of Hiran, Galgaduud, and Middle Shabelle*, February 2013, p. 39.
[10] *Report on Middle Shabelle Wadajir Outreach Program*, Federal Republic of Somalia, Ministry of Interior and Federal Affairs, April 2015, p. 4.

• Waa in si degdeg ah loo qorsheeyaa, sidii kaabayaasha Burburay loo dayactirilahaa, kuwaasi oo muhiim u ah xasilinta iyo dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee Gobolka, tusaale ahaan, wadooyinka, buundooyinka iyo kanaalada

• Waa in si degdeg ah loo dayactiro suuqyada hilibka iyo khudaarta.

• Waa in si degdeg ah loo dayactiraa dugsiyada, xafiisyada maamulka iyo nidaamka fayadhowrka degmooyinka.

• Xaruumaha talaalka; Xaruumaha MCH iyo xafiisyada Boliska waxaay u baahanyihiin in si deg deg ah loo eego.

• Baahi degdeg ah oo ku aadan sidii loo helilahaa nidaam fatahaadaha lagu xakameeyo. Fatahaadaha waa arin dhib badan Gobolka u horseeday ayadoo sanad kasto bara-kac iyo burbur dhaqaale sababta.

• Waa in si degdeg ah ceelal horleh loo qodaa, isla mar ahaantasna kuwii hore la dayac-tiraa"[11].

Howlgalka wacyigelintawuxuu gunaanadkiisu ahaa in dibuheshiisiinta iyo dibudajinta labaduba lasiiyaa mudnaanta koobaad "si dib uheshiisiin, nabad iyo xasilooni beelaha gobolka looga soo dabaalo"[12].

Geeddi-socod nabadeed ayuu Maamulka Gobolku horay u bilaabay, kaasoo xooga horumar ah laga gaaray. Shaqaaqooyin muddo sadex sana oo is dabajoog ahaa u dhaxeeyay beelaha Maxamad Muuse iyo Walamoy,kuwaasoo saameeyay bulshada oo idil, horseedayna inay reero badan barakacaan, ayaa kadib shan bilood oo wada-hallo ah xal loohelay. In kastoo WAGF, Wasiiru Dowlaha iyo xubnaha Guddiga dib-uheshiisiinta aay Maamulka iyo bulshadaba ku booriyeen in aay mustaqbalka isku dhac ka foojignaadaan, hadana waxaa aad loogu nuuxnuuxsaday in dib uheshiisiintu tahay barnaamij socdo, oo uu u baahan yahay gargaar degdeg ah.[13]

Ugu dambaynti, howlgalkii heerka Wasiir, wuxuu kusoo gabagaboobay in baahiyaha qaar ee degmooyinka Jowhar, Mahadaay iyo Balcad yihiin kuwo ayaga ku kali ah, baahiyaha assasiga ah waa kuwo aay wadaagaangidigeed SDH oo dhan.

Howsha u taalo Dawladda Federalka ah ee Soomaaliya (DFS) iyo saaxibadeeda caalamiga ah waa qorsheyn; abaabulidda ilaha dhaqaalaha iyo kala mudnaan siinta, si loo hubiyo in baahida aassasiga ah ee degmo kasta la daboolay.[14]

Qiimayn Guud

Muhimmada howlgalka qiimaynta waxaay ahayd in la soo ururiyo guud ahaan aragtida aay muwadhiniintu ka haystaan Federaal, gaar ahaanna, kan dismahiisu uu hadda Soomaaliya ka socdo, sidaDawladHoose, Maamul iyo xallinta khilaafaadka. Muddo 5 todobaad ah oo ku aadaneyd bilihi July, August iyo September 2015 ayaa waxaay kooxda qiimeynta wareysi la yeelatay odayaal, madax-dhaqameedyo, madaxda dadka laga tirada badanyahay, hogaamiyayaasha diinta, ururada haweenka, ururada dhalinyarada, ganacsatada, xubno ka tirsan fanaaniinta iyo xirfadlayaasha (sida qareenno, macalimiin, dhakhaatiir, iyo

[11] Marjici hore., p. 27
[12] Marjici hore., p. 25
[13] Marjici hore.
[14] Marjici hore., p. 27

xirfadlayaasha caafimaadka). Waddada wareysiyada loo maray waxaay ku koobnayd in lasoo ururiyo cadaymo la taaban karo oo ku aadan fikradda (aay ka haystaan) mawaadhiicda aan kor ku soo xusnay. Sidaa darteed, muhimmada qiimeynta gobollada loolama jeedin in la muujiyo qaladadka iyo aqoon darida dadka la waraystayaay Federaalka ka qabaan. Hase yeeshee, warbixintaan waxaay tilmaami doontaa qaar ka mid ah fahan laáantaas si loo iftiimiyo caqabadaha ku gudban geedi-socodka dhismaha Federaalka.

a. Fikradaha iyo cabsida laga qabo Geedisocodka Federaalka.

Dadka SDH degan fikradda aay Federaalka ka qabaan inta badan fahanlaàan ayaa hareysay. Guud ahaan, Federaalka waxaa loo arkaa inuu yahay nidaam dawladeed oo mideysan oo aay awood dibadda ah Soomaalidu gor ugu keentay. Si gaar ahaaneed, waxaa jiro aragtiyo u janjeerto inay (mowdhuuca) muraayad Itoobiyaan ah ku fiiriyan; sida inuu yahay duulaan aay Itoobiya Soomaali ku soo qaaday, si aay waddanka u qeybiso[15]. Dad badan waxaay dareemayaan inDhismaha Federaalka uu Soomalida isku dhac u horseedaayo, ama uuba yahay gumeysi cusuban.

Dhan markii laga eego, (ku dhawaaqida) erayga FEDERAAL ayaa wuxuuba noqonayaa caqabad hortaagan in la fahmo nidaamka Federaalka ah. Intuu howlgalkaani socday, dadkii aan la kulanay intooda badan markaan weeydiinay in aay nidaamka dowliga ah ee Federaalka aay soo dhaweynayaan iyo in kele, waxaay jawaabtoodu ahaydmaya. Markii suàasha dhanka kale loogu rogo oo la weydiiyo bal inaay sheegaan nidaamka dawladnimo ee aay doorbidayaan, waxaay un erayo kale ku micneeyeen Federaal. Tusaale ahaan, markii aay kooxda qiimeynta iska ilaalisay inaay isticmaasha erayga Federaal, oo aay dadka weydiiyeen in aay doonayaan, inaay doortaan wakiillo ayagamatalo, inaay khayraadkooga ayagu xakameystaan, jawaabtoodu haa ayay ahayd.

Sababtaasi aawgeed, iyo ayadoo af-Soomaaliga uusan ku jirin eray Federalism ku micno ah, ayaa kooxda (wax baareysay) waxaay isticmaashay erayadaan soo socdo:*Maamulka Baahsan* iyo *Isutag*, oo la micno aherayada Ingriiska ah ee: “broad-based administration/devolution” iyo “coming together”. Maadaama uu erayga “Federaal” xasaasi noqday, oo aay dadki shaki ka qaadeen, ayaa waxaay kooxda qiimayntu goàan ku gaartay, in hadii aay isticmaalka eraygaas ka fogaadaan, aay wareysiyadooda iyo wadahadaladooda noqonayaan mid miro dhal ah.

Arinta kale oo inta badan qalad loo fahmay waa waxa loo yaqaano *Fiscal Federalism*[16] oo ah sida Dawlada Dhaxe iyo Dawlad Gobleedyada xubnaha ka ah aay shaqada u kala leeyihiin. Arinta kale oo dadkii la wareystay aay aad u xiiseynayeen waa: sida kheyraadka waddanka loo wadaagayo. SDH wuxuu ka mid yahay gobollada Soomaaliya ugu qani san, dad badan waxaay filayaan in hadii al-Shabaab deegaanka laga eryo oo amaan la helo, uu dhaqaalaha gobolka sare u kici doono. Dadku waxaay doonayaan in aay dhaqaalahooda gacantoodu ku maamushaan oo aaysan Dawlada Dhaxe u meerinin. Dadku waxaay cabsi ka muujiyeen in hadii uu Federaalka hirgalo aay Dawlada Dhaxe xoolihii aay muruqoodu ku shaqaysteen inta ayaga laga qaado gobollada kale ee uu wax-soosarkoodu liito la siinyo. Sidaa aawgeed, markii aay qaybsasho timaado, dadku ma doonayaan in aay dhaqaalahoodagobolka Hiiraan la

[15]Aragtidaa assaskeedu waa mid dhibaatada siyaasadda Soomaaliyeed Itoobiya dhabarka u saareyso, ayadoon eegeynin doorka Soomaalida uga aadan amaanka iyo xasiloonida wadankooda.

[16] Fiscal Federalism waxaay khusaysaa fahmidda ku aadan, waa maxay shaqooyinka iyo agabyada aay Dawlada Dhaxe leedahay, iyo kuwa aay Dawlad Goboleedyada leeyihiin (Oates, 1999). Waxaa loola jeedaa sidaa Qarashyada iyo cashuuraha loogu dheelitiraayo qeybaha maamulka. Sida arintaas ayadoo faahfaasan loo meelmarinaayo waa waajib u taala kuwa distoorka dejinaaya, waana in aay Dawlad Goboleedyada dhexdooda ka doodaan.

wadaagaan. Qiimeyntaani waxaay muujisay in aay SDH ka jirin aragtida aha: si nabad iyo amaan loo helo, waa in aay sinaan dhaqaale jirtaa.

Waxaa xiisamudan in Odayaasha iyo qof kastoo dàweyn uusan jeclayn erayga Faderaal, ayagoo ku sababeyay in uu nidaamkaasi wadanka kala qeybinaayo. Dàyartu eraygaasi wax dhib ah uma arkaan. Waxaay u egtahay in aay yihiin kuwo nidaamka Federaalka diyaar u ah, ayagoo u arka inaay u tahay fursad aay dhismaha wadanka uga qeybqaadan karaan. Waxaa laga yaabaa in aay sabab u tahay ayadooy dàyartu aqoonin nidaam kale oo aay barbar dhigaan maxaa yeelay (dádooda) ayaanan u suurto gelinin in aay arkaanDawladii (Diktaatooriyadda) ee uu Siyaad Barre xukumaayay. Arinta kale oo xiisaha leh waa ururada haweenka ee degmooyinka lagu wareystay oo muujiyay aqoonta badan ee aay u leeyihiin geedi-socodka nidaamka federaalka ah. Waxaa si gaar ah xusid u mudan ururka haweenka ee Jowhar oo ahaa kuwii ugu aqoonta badnaa marki loo yimaado Federaal wuxuu yahay iyo siduu u shaqeyo.

b. **Xaaladda Dawlada-Hoose iyo Maareynta**

Kooxda qiimeynta waxaayka soo shaqeeysay todoba degmo oo rasmi ah, Jowhar (caasimadda SDH), Balcad, Mahaday, Cadale, Warsheekh, Aadan Yabaal iyo Run-Nirgrood. Labada u dambe weli gacanta al-Shabaab ayaa ku jiraan. Degmada siddeedaad ee aan welilagu heshiinin waa Raage Elle, taasoo qiiymeynta howlgalkaan aanay wax tixgelin ah siinin. Qiimeyntu waxaay usii degtay illaa heer tuulo, ayadoo xubnaha matalo aay xaruumaha qiimeynta imaanayeen si aay doodaha uga qeybgalaan.

Maamulka maxalliga ah ee SDH wuxuu u dhisanyahay qaabab kala duwan, sida golayaasha heer degmo iyo heer tuulo, laakin saraakiisha heerarkaan giddigood waa lasoo magacaabay. Inta badan awoodda magacaabeyso waa Dawlada Dhaxe (WAGF)iyo Gudoomiyaha Gobolka oo asaga laftiisaba Xamar laga soo magacaabay. Dhinac marki laga eego, inta badan dadkii la wareystay waxaay doorbideen in saraakiisha Maamulka Hoose aay noqdaan kuwo aay dadku soo doorteen halkii aay Xamar usoo magacaabi lahayd. Dhinaca kalena, waxaa jirto cabsi aay dadka qaar qabaan oo ah in doorasho aay beelaha deegaanka u badan oo kali ah faaìdo u tahay, halka beelaha lagatiradabadan yahay aay khasaaro u tahay. Si kastaba ha ahaatee, kooxaha laga tirada badanyahay waxaay cabireen dareenkooda ah in laga eexdo xitaa markii

aay Dawlada Dhaxe saraagiisha gobolka ayada soo magacaawdo. Markii si guud loo hadlo, waxaa la dhihi karaa, Maamullada Hoose ee Gobolka weli waa billow. Kooxda (qiimeynta) waxaay la kulantay Gudoomiyayaasha Degmooyin badan kuwaasoo karti iyo goàan-qaadasho leh, ayagoo xaalad adagku shaqeynayaan, meel uu qalabkii iyo adeegii assaasiga ahaa uu ka maqanyahay.

Guud ahaan, dadku waxaay la yaabeen markii aay kooxda qiimaynta weydiisay waxa aay rabaan in aay Dawladoodu u qabato. Sida muuqata, waxa ay ahayd markii ugu horeysay ee su'aal noocan ah la weydiiyo. Si kastaba ha ahaatee, waxaay u muuqataa in aay ahaayd fursad weyn ka qaybgalka dadweynaha ee degmooyinka aay booqdeen Kooxda qiimeynta. Waxaa la abaabulay maalmo dhalinyarta gooni u ah iyo maalmo dumarku aay leeyihiin, iyo sidoo kale ayaamo gaar u ahkulanka maamulka iyo odayaasha Degmooyinka.

c. Colaadaha iyo sida loo maareeyo

Inta badan dagaaladu waxaay ka dhex dhacaan labo beelood, marar badan jilib hoose amaba laf kasii hoose oo ka tirsan beesha weyn. Markaay noqoto deegaanka SDH waxaa ugu badan Abgaal oo ah beel ka tirsan Qabiilka Hawiye. Isku dhacyada intooda badan waxaay ka dhashaan arinma dhul ku saabsan, oo aay ka mid yihiin khilaaf xudduudeed, dhul daaqsin ah, xoola lakala dhacay iyo kheyraad lagu tartamaayo ama ila biyood. Taariikh ahaan, baahida iyo kala duwanaanshaha u dhaxeeyo reer guuraaga iyo beeroleyda ayaa sababi jiray isku dhacyada is dabajooga ah. Khilaafyadaas ayaa dhici karto inaay kasii daraan oo aay colaad isu rogaan ka dibna aay horseedaan dagaalo aargoosi ah.

Inta badan dagaalada ka dhaca Gobolka SDH waxaa xalliyo odayaasha dhaqanka ayagoo marayaan nidaamka *xeer*loo yaqaano. Odayaasha masùuliyadaas aay bulshada ku aamintay waxaay ku kasbadeen aqoonta fog ee aay deegaanka u leeyihiin. Ayagoo markaay garta galayaan, raadraacii dagaaladii hore iyo kan aay markaas xallinayaan, labadaba xisaabta ku darsanaayo. Mararka qaar labada nidaam ee Shariicada iyo Xeerka ayaa la isticmalaa, ayadoo madax dhaqameedyada iyo culumadaba aay hawsha isla wadaan. Tusaala ahaan, Shareecada waxaa la isticmaalaa markii uu jiro khilaaf dil dhacay salka ku hayyo.Marar kale Maamulka Gobolka iyo odayaasha dhaqanka ayaa si wadajir ah khilaafaadka u xalliya. Intii uu howlgalkaan socday waxaay kooxdu isu keentaysheekooyin badan, kuwaaso ku saabsan xallinta khilaafaadka oo aay dadki la wareystay kasoo ururisay.Tani waxaay muujinaysaa in aay jiraan hababb iyo nidaam u shaqeeyo bulshada Soomaaliyeed oo ka caawiyo sidii aay khilaafaadka u xallin lahaayeen.

Khilaafaad siyaasadeed oo lug ku leh ciidamada gobolka ee AMISOM, ciidamada Soomaaliyeed ama kuwa al-Shabaab ayaau muuqda in aay SDH dif ku yihiin, tusaalo ahaan markii Hiiran ama Shabeelada Hoose la barbar dhigo. Waxaa xiiso leh, in degmooyinka weerarada al-Shabaab u nugul aay yihiin kuwa AMISOM fikrida xun ka haysta, halka degmooyinka yara nabdoon aay fikrad midaa hore dhaanta ciidanka ka haystaan. Nin baa wuxuu yiri “Ma helo wax yar ooy qabteen, mahaase waa ku hoydaan”, ayaay degenaan jireen. Kaasoo ah hadal aay kooxda qiimeynta u fasiratay inuu muujinaayo wax qabad laàanta AMISOM. Dadka qaar ayaa waxaay muujiyeen rabitaankooda ku aadan in loo dhiso ciidan Soomaaliyeed oo dadka difaaca halkii AMISOM oo aanan weligeed joogeynin lagu tiirsanaan lahaa. Intaas waxaa raacsan, cabashooyin ku saabsan ka maqnaansha aay ciidanka Booliska ka maqanyihiin Maamulka Gobolka sida dad badan aay wareysiyada ku sheegeen. Dad badan waxaay ka xunyihiin in AMISOM aanay lug ku lahayn tababaridda Boolis Qaran ee Soomaaliyeed.

Deegaamada aay al-Shabaab xukunto wax dagaal beeleed ah lagama soo sheegin, ayadoo loo aaneynaayo al-Shabaab oo aanan (dagaal beeleed) u dulqaadanin.Si kastaba ha ahaatee, taas micnaheedu ma ahaha in deegaanadaasi aay asal ahaan si dhab ah u nabdoonyihiin.Xaqiiqadu waa nabad aay al-Shabaab si khasab iyo cabsigelin ah ku keentay, maadaama aay noolashi caadiga ahayd joojisay. In kasta oo aay jiraan isku day degmooyinkaas lagu xureynaayo, waxaa nasiib daro ah in kuwo horay loo xureeyay uu dagaal beeleed dib uga qarxay.

Aragtida Faahfaahsan ee Degmooyinka

1) Jowhar

a. Federaal

Inta badan ka qeyb galayaasha waxaa maqlidda erayga Federaal ugu horeysay wakhtigii Geedi-Socodkii Nabadda ee Mbagathi. Fikradaha aay Federaal ka qabaanna way ku kala duwanyihiin:

- *Federaal waa isu imaatanka dadyow kala duwan oo haysto dhaqamo kala nooc ah.*
- *Waa kaansar (cudur) cusuban sida nidaamkii awood qeybsika 4.5 ee Soomaalida, kaasoo aanan ku habooneyn waddan hal dhaqan wadaago.*
- *Waa nidaam wanaagsan laakin aay qasab tahay in aay dibuheshiisiin ka horeyso.*
- *Waxaan u fahannay inuu yahay nidaam isu keena dad uu dagaal kala geeyay.*
- *Awood qeybsi dhexmara Doowladda Dhaxe iyo DawladGoboleedyo.*
- *Hanaan isxukun ah.*

Qaar ka qaybgalayaasha ka tirsan waxaay la tahay in nidaamka Federalka uu yahay mid kordhinaayo xafiisyada siyaasadeed, taasoo qarash badan u baahan. Waxaay tusaalo usoo qaateen DawladGoboleedka Galmudug oo leh 97 kursi barlamaan ayadoowelina lasii kordhinhayo. Ka qaybgalayaasha waxaay yaqaanaan wadamo kale oo Federaal ah oo Soomaaliya ka baxsan sida: itoobiya, Ameeriko, Jarmalka iyo Imaaraadka Carabta. Ka qaybgalayaasha qaar oo aay la ahayd in Somaaliyaa aaysan wadamadaas kor ku xusan wax

saa u buuran ka faaìdeynin, waxaay fikradahooda ku saleyeen sadex arimood: 1. Qaar ayaa waxaay xuseen farqiga dhaqaale ee u dhaxeeyo Soomaaliya iyo waddamadaas, ayadoo wax lais barbar dhigaba aaysan meesha oolin. 2. Qaar kale waxaay sheegeen, in aaynan wadamadaasi weligoodba tagin, sidaa darteedna aaysan waxba ka sheegi karin siduu Federaalka xagaas uga hirgalay. 3. Kooxda sadexaadwaxaay yirahdeen, waa in dadku Federaalka lagu tababaraa si la mid ah sidii aay Dawladii Siyaad Barre u lahaan jirtay dugsiyo Shuuciyadda lagu barto.

Ka qaybgalayaasha intooda badan waxaay la tahay in uu dhaqanka Soomaaliyeed qeyb libaax ka qaadan karo geedi-socodka dhismaha Federaalka.

- *"Weligeen Federaal ayaanu ahayn. Tusaale ahaan, Soomaaliya waa hal qabiil oo u kala baxo beelo, laf laf, jilbo-hoose iyo wax la mid ah, ayagoo kor mid ka ah hoos ahaanna qeybsan".*
- *"Suàashu waa, Federaal ma yahay mid Quraanka ka hor imaanaya? Nasiib wanaag jawaabtu waa maya ma aha mid Quraanka kasoo horjeedo; sidaa aawgeed waa mid dhaqanka la jaanqaadi karo".*

Qaar ka qaybgalayaasha ka tirsan waxaay kasoo horjeesteen, habka Federaalka hadda lagu wado, oo ah in dadka kor loogu keeno, ayagoo door biday inuu noqdo mid hoos laga soo abaabulay. Ka qaybgalayaasha fikrada kala duwan ayaa waxaay ka muujiyeen is barbar dhigga Dawladii dhaxe ee 1991 burburtay iyo nidaamka Federaalka ah ee hadda socdo. Qaar waxaay nidaamka DawladDhaxe ku magacaabeen Diktaatooriyad, halka aay Federaalka u arkeen inuu yahay mid heer kast oo bulshada ah aay ka qeybqaadanayaan, oo weliba ah mid dadka si dhow ugu adeegaayo. Kuwo kale waxaay yiraahdeen "*Annagu waxaan nahay dad wada Muslim ah, Federaalna waa siyaasad aay Itoobiya wadato, taasoo aan baranay sida loogu sacab tummo*".

Kuwa diidan waxaay ku andacoodeen in Federaalka uu yahay midnimada Soomaaliyeed mid kala dhantaalaya. "*Qaar soomaalida ka mid ah ayaa sanadki 1943 midnimada diideen, maadaama aay xukunki Ingriiska ka horyimaadeen. Maantana waxaan sameyneynaa qalad kii la mid ah, hadii aan qaadano Federaal midnimada Soomaaliyeedcaqabad ku ah*" ayuu yiri mid ka mid ah ka qaybgalayaasha. Mid kale ayaa wuxuu Federaal ku tilmaamay inuu yahay wax qalaad: "*Markii uu Madaxweeyne DawladGoboleed, waddan kale booqdo, madaxweeynaha waddankaas ayaa qaabila. Federaalku ma Saasbaa*?" Ayuu weeydiiyay. Badankood ka qaybgalayaasha degmooyinka ee taageersanaa nidaamka DawladDhaxe, waxaay shaqaalo dawladeed ka ahaanjireen Maamulkii Siyaad Barre, waa halka aay ku salaysantahay fikradooda Federaalka ka horimaadsan. Kooxda Qiimeynta waxaay taas u aragtaa, inaay un tahay hillow aay berisamaadkii u qabaan ee aaysan ahayn mid xulasho ku salaysan.

Ka qaybgalayaashu waay maqleen dadaalada ku aadan in Hiiraan lagu biiro, taasoobadankoodu aay soo dhaweeyeen. Sababaha (aay u soo dhaweeyeen) waxaa ka mid ah in bulshada labada Gobol degan aay isku mid tahay, iyo iyada oo aay deegaamadaasi yihiin kuwa kali ah oo aanan weligobolna ku darsamin. Fanaaniita waxaay sheegeen in aay ku gudo jiraan diyaarinta heesihii iyo gabayadii isku biiritaanka lagu amaani lahaa. "*Waa caana caana lagu daray*" ayuu yiri mid ka mid ah odayaasha dhaqanka.

Ka qaybgalayaasha qaar kasoo jeeda bulshooyinka laga tirada badanyahay ayaa waxaay sheegeen inaay jiraan labo qolo oo deegaanka ku badan oo qeybta libaax ee kheyraadka qaadandoono. Dareenka bulshooyinkaas laga tirada badanyahay waa: in kahadalka Federaalka uusan wax micno ah u sameyneynin. Qaarkood shaki ayaay midowga Hiiraan lala midoobaaya ka muujiyeen. Dareenkoodu wuxuu ku aadanyahay in Hiiraan xagga dhaqaalaha

aaysan jirin wax aay SDH ku soo kordhin karto. Maciishadda unbaa ku qaaliyoobeysa (haday isku biiraan) sababtoo ah canshuuraha ayaa lagu kordhindoonaa. "*Xagga dhaqaalaha way ka liitaan, taa micnaheedu waa in SDH canshuurta lagu gordhiyo si Hiiraan loo hormariyo*"ayuu yirimid ka qeybgalayaasha ka mid ah. Qaar kale ayaa waxaay sheegeen inaay jiraan suàalo aanan weli jawaabo loo helin, kuwaasoo isku dhacyo horseedi karo:

- *Gobolkee uu madaxweeynaha ka imaanayaa?*
- *Gobolkee lagu qabanayaa shirarka dibuheshiisiinta iyo isku darsanka?*
- *Deegaankee magaalo madaxda qaadanaayo?*

Qaar waxaay sheegeen, in kastoo aay midowga soo dhaweynayaan, hadan waxaa muuqata inaay jiraan qaladya xagga mudnaanta ah. "*Dadka deegaano kale uma safri karaan maadaama aay al-Shabaab inta bada dhulka Hiiraan joogaan*". Dadkaani waxaay ku doodayaan, inaay haboonaanlahayd in horta deegaannadaaay al-Shabaab haystaan la xureeyo, oo aan midow lagu degdegin.

b. Maamul Hoose

Dadkii la wareystay waxaay kooxda qiimeynta u sheegeen in degmadu aay 300 oo tuulo ka kooban tahay. Waxaa jira Gole Degmo oo aay Wasaaradda Arimah Gudaha iyo Federaalka magacaawday. In kaste oo aaysan jirin hab dhiiri gelinaya dumarka si aay uga qeybgalaan qorsheynta iyo goàan qaadashada (sida Golaha Sharci-Dejinta ee maxaliga ah), hadana ka qaybgalayaasha waxaay sheegeen in Maamulku si cadaalad ah lagu soo dhisay

Kooxaha kala duwan (ee ka qeybgalayaasha) wada shaqeyn wanaagsan ayaa Maamulka Jowhar kala dhaxeysa. Lakin aqoonta aay Dawladda Muqdisho degan u leeyihiin waxaay ku koobantay inta aay idaacadaha ka maqleen.Waxaay cadeeyeen inaysan weligood arag Hayàd arimaha Federaalka la tacaaleysa.

Kooxaha (la wareystay) waxaay sheegeen in uu Maamulka Degmada bixiyo adeegyada kala ah: nalalka jidadka, waddoyinka baabuurta, Iskoolada, Amniga iyo dayactirka. Biyaha iyo korontada waxaa maamula shirkada gaar loo leeyahay. Degmooyinka uu qaranku shaaciyay, xeerka Maamullada Deegaanka iyo inaay Jowhar ka hirgashay, midna kooxdu war uma haynin.

c. Xallinta Khilaafaadka

Isku dhacyada dadka degmada ku nool waxaa ka mid ah dagaal beeleedya hubka laisu adeegsado, laakiin inta badan shaqaaqooyinkaas degmada kama gudbaan.Isku dhacyada intooda badan waxaay ka dhashaan arinma xudduudbeeleed ku saabsan, oo aay ka mid yihiin dhul daaqsin ah, xoola la dhacay iyo beero. Dagaalada waxaa kaloo kiciya abaaraha iyo dad la dilay. Khilaafaadka waxaa xalliya odayaasha dhaqanka ayagooadeegsanaaya nidaamka *xeer*oo aaySaraakiishaDawladana taageero kaga helayaan. Mararka qaar xirfadlayaasha ayaa ayagunadhenacooda ka taakeero. Xirfadlayaasha (qareenada iyo xirfadlayaasha sharciga, macalimiinta, dhakhaatiirta iyo xirfadlayaasha caafimaadka) waxaay u arkeen in sida ugu wanaagsan aay tahay in wixii xal ah oo horay loo gaaray (sida kii xudduudyada beelaha ee shirki dib u heshiinsiita lagu gaaray) ku meel gaar ahaan siduu yahay loo daayo.

Madaxda diinta ee Jowhar qeyb kama aha shirarka nabadda iyo dib u heshiisiinta. "*annaga ma aadna shirarka xallinta khilaafaadka iyo dib u heshiisiinta maxaa yeelay Soomaali waxaa*

tiri "wacow laàn ganbar laàn ayay leedahay"". Soo noqnoqoshada dagaalada ayaa waxaay ku sababeeyeen doorka culamada[17] oo meesha ka maqan, ayagoo leh rag xallinta khilaafaadka u tababaran.

Kooxda la wareystay waxaay sheegeen in shacabka badankiisu uu hubeysanyahay, in kasta oo uusan hubkaasi ahayn mid muuqda. Si kastaba ha ahaatee shacabka waxaay dareemayaan in booliska iyo ciidanka militeriga ah (oo labadaba Dawlada dhaxe ka tirsan) aay aamaanka sugayaan. Kooxdu waxaay AMISOM u aragtaa in aay yihii kuwa dhulka la xureyayun illaaliya. "*Soomaalida foobiya ayaay ka qabaan amarradana Bujumbura ayaay ka qaataan*" ayuu yiri mid ka qaybgalayaasha ka mid ah. Mid kalena wuxuu yiri "*waa in ciidamo qaran oo Soomaliyeed lagu badalaa*". Hogaamiyayaasha diinta waxaay door bideen in aaysan arimaha AMISOM kaba hadal.

2) Mahaday

a. Federaal

Dadki la wareysta waxaay intooda badan Federaal maqleen wakhtigii Abdullaahi yussuf Madaxweyne loo dooranaayay, inkastoo dumarka intooda badan aay ereyga maqleen wakhtigii Hassan Sheikh la dooranaayay ee 2012. Kooxdu waxaay yaqaanaan wadama Federaal ah oo aay ka mid yihiin Itoobiya, Kenya, Hindiya, iyo Spain. Ka qaybgalayaasha intooda badan waxaay la tahay in Federaal uu yahay iskaashi ka dhaxeeyo kor iyo hoos. Inkastoo dadka lala hadlay intooda badan aay u arkeen in Soomaaliya aay wadamadaas Federaalka ah arimaha nabadda iyo xasiloonida ka faaìdeysan karto, hadana dumarka taasi waay kasoo horjeesteen. Ayagoo ku doodaaya (xaqiiqada ah), in farqiga dhaqaale ee u dhaxeeya Soomaaliya iyo wadamadaas Federaalka ah uusan u suurta gelineynin in aay wax ka bartaan.

Intooda badan waxaay aaminsanyihiin in Federaalka iyo Dhaqanka Soomalida aay is waafaqsanyihiin. Mid ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa wuxuu ku dooday, in hadda uu jilib-hoosaad kasta *Nabad-Doon* leeyahay, ayadoo Beeshuna aay Suldaa sare leedahay. Kuwa diidan ayaa ayaguna waxaay ku doodeen in Federaal aanan loogu tirigalin ummad sida Soomaalida oo kale isku mid ah, oo diin, dhaqan iyo luqadba wadaagto. Waxaa kale oo aay shaaca ka qaadeen in xaqiiqada xoola-dhaqatada Soomaaliyeed aysan ogolaaneynin habka Federaalka ah, sababtoo ah wuxuuku kala oodayaa xudduudo, taasoo ka hor istaageeysa in aay dhul biyo iyo daaqsin leh xoolahooda u raadsadaan.

Hase ahaatee, waxaa la ogsoonyahay oo laisla ogolaadayin aay haddaba xudduudo jiraan. Marka aay beel doonayso in aay xoolaheeda u raadsato dhul kale oo biyo iyo daaq leh, waa in beesha dhulkaasi degan la war-geliyaa oo weliba ogolaansho laga helaa. Waxaa kale oo aay dad badan isla garteen in arinta Federaalka gundhigga u ah aay tahay wadatashi dhexmara Dawlada qeybaheeda sare illaa heerka ugu hooseeyo, taasoo (isla markaa) ah assaska uu ku dhisanyahay habka aay beelaha wax u goàmiyaan. Mar aan la hadleynay qaar ka tirsan odayaasha dhaqanka iyo kuwo dhalinyarada ka mid ah, ayaa waxaay soo bandhigeen fikrado qaar xag-jir ah oo aanan mawdhuucaba xiriir la lahayn:

- *Federaal waa Ragga iyo Dumarka oo la simo.*
- *Federaal waa Khaniisnimo.*

[17] Madaxda diinta

Waxaa dhamaan inta badan aay isku ogolaatay in nidaam Federaal ah oo hoos laga soo dhisa si dagdag ah loogu baahanyahay, ayadoy jirto baahi loo qabo in aay dadka qofkay ku kalsoonyihiin doortaan.

NidaamkiiDhaxeee hore waxaa loo arkay inuu ahaa kaligii-talis. In yar ayaa taas khilaaftay sida aay qoftaan dumarka ah sheektay:

- *Farqiga wuu iska cadyahay. Xiligii Siyaad Barre ayaa noo roonaa. Inuu qabrigiisa kasoo toosa roonaan lahaydaa.*

Isku biiridda Hiiraan iyo SDH, kooxda Mahaday si weyn ayaay u soo dhaweeyeen. Intooda badan waxaay la tahay in midowgu uu horseedaayo is-dhexgal iyo dhaqaalaha oo sare u gaca. Qaar aan badnayn ayaa waxaay dheheen: isku darsanka waa seef laba afood leh, anagoo ku waano qaadaneyno dismihii Maamul Goboleedkii Galmudug oo aay dadka qaar horumar u arkeen, ayadooqaar aay Ahl-Sunna wa al-Jamaaca ka mid yihiina, dagaal hubeysan kala hortegeen. Qaar kale oo taas ku gacansayray, waxaay u arkeen inuu yahay mid beesha badan oo kali ahfaaìdo u leh. Guud ahaan, mucaarad sidaas u buuran oo ku aadan nidaamka Federaalka ah ma lahayn kooxdu. Waxaa xiiso leh in aragtidii ahayd in Itoobiya aay soomaaliya saameeyn ku leedahay aaysan ka jirin Degmada Mahaday.

b. Maamul Hoose

Maamulka degmada ee Mahaday hal sano ayuu jiraa, lakin maadaama uu al-Shabaab kaadka u saaranyahay, illaa hadda wax adeeg ah bulshada ma aaysan gaarsiinin. Amaanka waxaa sugo Militeriga Soomaaliyeed maadaama aay Degmada boolis lahayn. Ka qaybgalayaasha waxaay dharrareen maalinta aay adeegyadiiassasiga ahaa Degmada dib u helidoonto. Ayagoo farta ku fiiqay Iskool cusuban oo mar aan fogeen uu Ururka Dawladaha Islaamka dhisay, kasoo weli xiran. Si kastaba ha ahaatee, muwaadhiniinta si wax ku ool ah ayaay (Howlgalkaan) ugu qeybqaateen.

Waxaay kooxaha oo dhan sheegeen in intii bilo ah aaysan al-Shabaab wax dagaal ah soo qaadin, in kasta oo khatartoodu aay weli taagamtahay. Waxaa jirta cabsi guud oo ku aadan ka hadalka arimaha al-Shabaab. Ma jirto koox kooxaha ka mid ah oo aragtay Hayàd arimaha Federaalka iyo dib u heshiisiin ka shaqeyneyso.

c. Xallinta Khilaafaadka

Kooxyadoo dhan waxaay qirayaan in deegaanka aay ka jireen dagaalo guud ahaan u dhaxeeyay beraaleyda iyo reer guuraaga. Sababaha dagaalada ayaa la sheegaa inay yihiin kheyraadka oo loo loolamayo ama kuwo abaaraha aay sababeen. Dagaaladaasi waxaa xalliyay culumada iyo odayaasha dhaqanka ayagoo nidaamka *xeerka*adeegsanaaya.

AMISOM aragti xun ayaay inta bada kooxaha reer Mahaday ka haystaan. Waxaa lagu tilmaamay in aay yihii kuwo wax ma tarayaal ah oo hubka u haysta in aay si aan kala sooc lahayn shacabka ugu gumaadaan. Marka aay AMISOM sidaa u dhaleeceynayaan, waxaay soo xiganayaan dhacdo inta uu howlgakaan socday magaalada Marka ka dhacday. Ma jirin wax dhacdo ah oo AMISOM ku saabsan oo degmadooda ka dhacay oo aay sheegeen. Dhacdada

Marka, waxaa AMISOM lagu eedeeyay in aay laayeen labaatan iyo afar ruux oo shacab ah oo aroos dhiganaayay[18]. Marka waxaay ku taalaa Shabeelada Hoose.

3) Balcad

a. Federaal

Kooxaha intooda badan Federaal aay maqlaan waxaa ugu horeysay doorashadii madaxweene Hassan Sheikh ee 2012. Inta badan kooxaha fahanka aay Federaal ka qabaan waxaa lagu soo koobi karaa:

- *Dad wada nool oo kheyraad wadaagay.*
- *Buunda loogu gudbo (caqabadda) Qabyaalada.*
- *Federaal waa isu keenida beelo iyo bulshooyin kala duwan si aay u assasaan Maamul Hoosaad.*

In yar ayaa (hadalkaas hore) khilaafsan, ayagoo aaminsan in Federaalku yahay qabyaalad lasoo macmaceeyay.

- *Federaal waa qabyaalad si kale loo yiri, laakin waa un qabyaalad*.

Badankood ka qeybgalayaashu waxaay aaminsanyihiin in Itoobiya laga baran karo casharro ku aadan hanaanka Federaalka ah.

Tusaale ahaan, suurtagalnimada ah in dad horay u dagaalamay isu yimaadaan, iyo in dadaal badan lagu bixiyo sidii arintaas aay ku suurtogelilahayd.

Waxaa jira soo dhaween aay dadka intooda ugu badanka muujiyeen in Hiiraan iyo SDH aay isku biiraan. Qaar ayaa waxaay labada gobol ku tilmaameen “candha iyo caanaheed”. Mid ka qebgalayaasha ka mid ah ayaa gabay ku cabiray:

- *‘Wixii rag ku tashado’*
- *‘Rabinna Aqbalo’*
- *‘Waay rumoobaan’*

Si kastaba ha noqotee, waxaa jirtay cabsi ku aadan in isku biiridda kadib xafiisyada Dawlada oo dhan Beledweyne loo raro. Guud ahaan dadka intooda badan waxaay rabaan hanaanka Federaalka ah, intaanan ka ahayn dumarka badankooda oo doorbideen nidaamka Dawlad-Dhaxe. Dumarku waxaay si uu hilow ku jiro u wariyeen, berisamaadkii wakhtigii Dawladii Dhaxe ee Siyaad Barre, siduu wadanka u mideysnaa. Waxaa jirta isfahan guud oo ku aadan in Federaalka iyo dhanqanka Soomaaliyeed aay isla jaanqaadi karaan.

Kooxaha oo dhan waxaay sheegeen in illaa maantadaan la joogo aaysan arag Hayàd arimaha Federaalka la tacaasha, in gasta oo la sheegay in hayàdahaan hoos ku xusan aay dhamaantood ka shaqeynayeen Nabadda iyo Maamul Hoosaadka: Tubta Nabada, Center for Research and Development (CRD), International Organization for Migration (IOM), Nordic International Support Foundation (NIS) and Somali Youth Development Network (SOYDEN). Ka qaybgalayaal ayaa sheegay in aay jiraan dad aay WAGF magaalada Jowhar ku siisay

[18] Eeg Al-Jazeera, AU troops 'gun down unarmed civilians' in Somalia, 21 July 2015, http://www.aljazeera.com/news/2015/07/au-troops-gun-unarmed-civilians-somalia-150721132538943.html

tababarro Federaalka ku saabsan. Kooxaha oo dhan waxaay sheegeen in Wasiiru-Dowlaha Wasaradda Arimaha Gudaha iyo Federaalka uu Balcad booqday asagoo dadka ku wacyi geliyay nidaamka Federaalka ah iyo Maamu-Hoosaad.

b. Maamul Hoose

Golaha Degmada waxaa soo magacaabay WAGF ayagoo fuliyay adeegyo bulsho oo badan. Adeegyadaas waxaa kamid; dayactirka wadooyinka, nalalka jidadka, waraabinta beeraha, kanaalada, Xaruunta Hanuuninta Bulshada, suuqa, nadaafadda, ururinta qashinka, iyo waxbarashada bilaashka ah ee dugsiyada hoose. Ka qeybgalayaasha waxaay sheegeen in wadatashi wanaagsan uu bulshada ka jiro, in kasta oo qaar aan badnayn aay habka xulashada dhaliileen.

- "*Balcad waxaan ku nahay 11 beelood, lakin shan bes ah ayaa laga soo xushay, inta kala waa marti*" ayuu yiri mid ka qeybgalayaasha ka mid ah.

c. Xallinta khilaafaadka

Sida aay kooxaha soo tabiyeen, horay colaad waay u jirijirtay, lakin haddadaan la joogo arliga waa nabad. Waddada dhaqanka ayaa guud ahaan khilaafaadka lagu xalliyaa. Dhalinyartu waxaay sheegeen doorka firfircoon ee aay dhismaha nabadda ka qaateen. Tusaale ahaan, dagaal beri labo beelood oo Abgaal ka tirsan u dhaxeeya, 40 dhalinyaro ah oo kuligood wada mutacalimiin ah, kuwaas oo ka tirsanaa beeshii duulaanka soo qaaday, intaay aaski ninkii aay beeshoodu dishay yimaadeen ayaa waxaay dhaheen: kuligayn na laaya oo ninkaan aay beeshayna idinka dishay u aargoosta. Talaabadaan geesinimada leh ayaa waxaay sababtay, in labadii beelood ee muddada badan dagaalamaayay aayGeedka Wada-Hadalkasoo hoos fariistaan.

4) Cadale

a. Federaal

In yar oo ka qeybgalayaasha ka mid ah ayaa markii ugu horeysay Federaal waxaay maqleen 2001, halka aay badankoodu marki ugu horeysay ereyga maqleen doorashidii 2012. Aragtida aay Federaal ka qabaan waa mid kala duwan. Qaar waxaay u arkaan inuu yahay nidaam qofku uu ruuxa asaga matalaayo si xur ah u doorto, oo qofka hogaamiyaha ahna uusan kaligii-talis ahayn, dadkuna aay simanyihiin. "Cid kasta DawladGoboleedkeedaayadaa iska leh, Dawlada Dhexana waay inoo wada dhaxeysaa". Dumarka markii laga reebo, koox kasta waxaa ku jiray dad Federaalka fikrad qaldan ka haysta. Qaarbaa waxaay u haystaan in uu Federaalku yahay habka "qaybi oo hogaami" iyo caqabad hor istaagan in Soomaaliya aay dib usoo kabato oo aay noqoto Libaaxii Afrika. Wxaay aragtidoodu ku saleeyeen in wakhtigii Dawladii Dhaxeaay Soomaaliya ciidan militeri oo xoogan lahayd. Halka uu Federaalka u keenay lix madaxweyna iyo qaran taag daran.

'Caag wayso waa ka wayn yahay, wax kalaa ku hoos jiro'.

Ka qeybgalayaasha badankood waxaay garanayaan in Itoobiya, Ameerika, Jarmalka iyo Kenya aay tusaale u yihiin Dawladaha Federaalka ah. Waxa wadamadaasi laga baran karo ayaa waxaay ka xuseen; in Federaalka uu yahay nidaam lagu mideeyn karo waddan uu dagaal kala qeybiyay. Kuwo kale ayaa waxaay aaminsanyihiin in Soomaaliya aay Amerika iyo

Jarmalka ka baran karta habkii quwad xag dhaqaale iyo xag siyaasadba aduunka xoog ku leh aay u noqonlahayd. Dhanka kale, qaar baa waxaay sheegeen in aanan Kenya iyo Itoobiya waxba laga faaìdeynin. "*Ma jiraan wax aan Kenya iyo Itoobiya ka baraneyna, maxaa yeelay dhulaayayba naga xadeene*" ayaay ahayd aragti aragtiyada ka mid ah. Dhanka Jarmalka iyo Amerika, waxaa la xusay, farqiga dhaqaale ee ayaga iyo Soomaaliya u dhaxeeya in uu yahay caqabad hortaagan wixii laga baran lahaa. Dhanka Kenya, waxaay sheegeen in Federaalka uu ayaguba ku cusub yahay, oo aan la gaarinba wakhtigii wax laga baran lahaa.

Waxaa jira taageero heer sare ah oo loo hayo midowga Hiiraan iyo SDH. Midowgooda waxaa lala mid dhigay sidii labo walaala ah oo markaay muddo kala meel ku noolaayeen ugu dambeyntii isu tagay. (Abgaal iyo Xawaadle waxaay labadaba ka tirsanyihiin beesha Hawiye). Waxaa xusid mudan, in kasta oo aay labadaasi beelood sheeganayaan in aay ayagu yihiin kuwa gobolladaasi ugu badan, hadana waxaa jiraan beelo kale oo badan oo gobolladaas dego.

Qaar baa waxaay la tahay in DawladGoboleedkaan cusuban uu awood dhaqaale yeelan karo, marki la fiiriyo dekedaha iyo beeraha SDH oo lagu daray dhulka daaqsinka ah ee Hiiraan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira dad aanan fikradda midowga gacma furan ku soo dhaweneynin. Qaar waxaay u arkeen in aay qalad tahay, maxaa yeelay khilaaf xagga xudduudaha ah ayaay bulshada u keeneysaa, iyo in kheyraadki oo dhan Hiiraan loo raro. "*Dib u heshiisiin isku biirida kahor*" ayaay fariintooda ahayd. Badankoodu waxaay aaminsanyihiin in dhaqanka Soomaaliyeed uu Federaalka la jaanqaadi karo, ayagoo cadeyn u soo qaatay Barlamaanka Federaalka ee Soomaaliyeed oo aay Madax-Dhaqameedka soo xuleen.Ayagoo (is ogolaanshaha dhaqanka iyo Federaalka) muujinaaya, ayaa waxaay sheegeen xaqiiqada ah in reer kasta uu leeyahay caaqil, Jilib kastana uu oday dhaqameed leeyahay Beeshuna aay ugaas iyo wax la mid ah leedahay taasoo micnaheedu tahay asalka dhaqanka Soomaaliyeed waaba Federaal.

Inta badan waxaay yiraahdeen kala duwanaanshaha u dhaxeeya Dawladii Dhaxe ee wakhtigii Siyaad Barre iyo Federaal wuu iska cadyahay. Dawladii Dhaxe waxaa lagu nacay maadaama aay gobolka dayacday. Si uu u muujiyo dhayacaada degmada Cadale soo gaarti, mit ka qeybgalayaasha ka mid ah ayaa wuxuu tiriyay Shirib[19] Abgaal oo caan ah oo la tiriyay hadda ka hor mar uu Siyaad Barre deegaanka meel ka mid ah soo booqda:

- *'Weligiin ma aragteen, toban kun oo tub iyo ceel iyo daqtar aan lahayn?*

Si kastaba ha ahaatee, fikrada is khilaafsan ayaa sidoo kale la maqlay: Qaar baa aaminsan horumarkii dhaqaale ee aay Soomaaliya wakhtigii uu Siyaad Barre xukumaayay gaartay inuu nidaamkii Dawlad-Dhaxe sabab u ahaay.

b. Maamul Hoose

Dagmadu waxaay ka koobantahay 37 tuulo. Sanad ka hor ayaa al-Shabaab laga xureyay. Kooxdu waxaay noo sheegeen in Degmadu uu hal Gudoomiya Degmo oo kali ahjoogo, kaasoo aay WAGF soo magcaawday, asagoo khilaaf laàan degmada maamulo. Ka qeybgalka bulshada wuu fiicnaa inkastoo Maamulka Hoose ee Dagmada uuysan wax adeeg ah bixinin, intaan sugidda amaanka ka ahayn.

Degmada Cadale in ka badan 100 Mile ayaay Muqdisho ka fogtahay. Waddada waa carro baabuurta xooga leh oo kor u qaadan unbaa gaari karto. Koronto ma laha, mana laha mawjadda FMta si aay dadka akhbaarta ula socdaan. Waxaa laga yaabaa in arimahaas aan soo

[19] Shirib waa nooc suugaanta Soomaaliyeed ka mid ah oo aay Hawiyaha caan ku yihiin.

xusnay aay raad ku yeeshaan howlgalka qiimeynta degaanka oo aan ku falanqeyneynay arimo dadka assas u ah. Waa meel Muqdisho aad ugu fog, al-Shabaabna aad ugu dhow. Dadka Degmada Cadale degan aad baay geeri-goàn u yihiin, waxaay is weydiinayaan in hadii waddadu u dhisnaan lahayd, aay adeeg bulsho ooDawladeed heli lahaayeen iyo inkale?

c. Xallinta Khilaafaadka

Waxaay ka qeybgalayaasha oo dhan qireen in aay jireen dagaallo u dhaxeyay dadka deegaanka, kuwaasoo xal loo helay. Sababaha dagaalkaassaaska u ah waa biyo iyo dhul daaqsin ah. Inta badan dadku waay hubaysanyihiin, lakin maàha mid muuqdo oo la arko. Khilaafaadka waxaa xalliyo oday dhaqameedyada iyo culumada ayagoo adeegsanaaya xeerka iyo Quraanka. Waxaa xusid mudan in culumadu doorkooda ku aadan xallinta khilaafaadka uu ahaa mid aad u muuqdo. Tusaala ahaan, waxaa la sheegay in muddo sanada ka hor ah aay jireen dagaalo soo noq noqday. Culumadii Degmada Cadale oo dhan ayaa waxaay guàansadeen in aay xiraan dhamaan dugsiyadii Quraanka, waxaayna diideen in aay xaflad nikaax ka qeybqaataan. Tan waxaay beelahii dagaalamaayay ku khasabtay in aay dirirta joojiyaan oo aay geedka wadahadalka soo hoos fariistaan.

Nasiib daro, degmada Boolis ma joogo, lakin waxaa joogo ciidamada Soomaaliya iyo xooggaga AMISOM. Kooxaha oo dhan waxaay sheegeen inaay AMISOM ku qanacsanyihiin oo aay wadashaqeyn fiican ka dhaxeysa. Kooxaha oo dhan waxaay sheegeen in Degmooyinka ku heeran uu xiriir wanaagsan kaladhaxeeyo, lakin waxaay muujiyeen walwalka aay ka qabaan al-Shabaab oo joogto meel 40km Cadale u jirto

Inkasta oo Hayàda aay ka mid yihiin WHO, UNICEF, iyo SAACID[20] aay xaga caafimaadka Degmada ka howlgalaan, ma jiroqof Kooxda ka mid ah oo arkay hayàd federaal, nabadda iyo Maamul Hoose ka shaqeyneysa.

5) Warshiikh

a. Federaal

Ka qebglayaasha intooda badan waxaay ereyga Federaal maqleen doorashadii Hassan Sheikh ee 2012. In yar (oo ayaga ka mid ah) unbaa sheegtay in uu yahay nidaam dhiirigelinaaya isdhexgalka bulshada. Ameerika, Imaaraadka Carabta iyo Itoobiya ayaa waxaay ka mid yihiin wadama badan oo Federaal ah oo aay kooxdu taqaanay. Hal wax oo Itoobiya laga baran karo, sida aay kooxo badan sheegeen, waa suurtagalnimada in Magaala-Madax iyo Dawlad-Goboleedya aay awoodda dhib laàn qeybsankaraan. Hal wax oo muhiim ah oo Soomaaliya aay Itoobiya ka baran karto waa suurtagalnimada ah in xitaa qof ka soo jeeda beelaha laga tirada badanyahay uu Qaranka madax u noqon karo. Hase yeeshee, kooxaha intooda badan ayaa waxaay la noqotay in aaysan jirin wax Itoobiya laga baran karo. Waxaa sababaha aay sheegeen ka mid ahaa, in Itoobiya aay dhismaha nidaamka Federaalka ah meel marisay goor aay xasilooneed, halka aay Soomaaliya dooneysa in aay Federaal dhisto ayadoo Dawladii Dhaxe aay taag darantahay.

- *Federaal waa mid Soomaaliya degmo degmo u kala qeybinaaya. Tani ma fiicna maxaa yeelay waxaa jiro calamo kala jaad jaad ah iyoo madaxweenayaal Itoobiya u kala tartamaaya.*

[20] Waa Urur aay dumar Soomaali leeyihiin oo aan Dowli ahayn: https://saacid.org/

- *Anagu waxaan u aragnaa in aay tahay siduu yiri Mustafa Sheikh Cilmi: "Hal mar madaxweeyne i dhaha"*[21].

Inkastoo kooxaha intooda badan aay nidaamka Federaalka ah diidanaayeen, hadana markii nidaamka Dawlad-Dhaxe iyo Federaal laisu barbar dhigo, waxaay door bideen Federaalka. Waxaay Nidaamkii Dhaxe ee Siyaad Barre ku dhaliileen in uu ahaa mid wax kasta oo horumar ah Muqdisho oo kali ah ku koobay. Ka qeybgalayaasha waxaay intooda badan la tahay in aanan loo dulqaadan doonin in goàamada aay Muqdisho uun uga yimaadaan. Waxaa kale oo aay is dareensiiyeen in ayagoo ah bulsho aqoon sare leh, oo aduunyada ku safray, in aay fikradda Dawlad-Dhaxe oo ayaga goàamo u gaareeyso aay tahay fikrad wakhtigeedi lasoo gudbay.

Si kastaba ha ahaatee, in yar ayaa nidaamka Dawlad-Dhaxe doorbideen. *Nidaam dhaxe ayaa fiican, maxaa yeelay hadda adeegyadii assasiga ahaa shirkada gaar loo leeyahay ayaa haaysta; tusaaleahaan, calankii Soomaaliya iskoolada ma dulsaarno, oo waxaa (lagu baraa) inta waddan Carbeed oo dunida joogto Manaahijtoodi.* Inta badan iskoolada Soomaaliya waxaa maamulo hayàda waddamo Carbeed laga leeyahay, waxaayna ku soo rogeen Manaahijtawadamadii aay ka yimideen. Fikradda dhalanyartu waa; in habka Federaalka ah ee kor ka soo bilaabaanaayo (sida aay hadda Soomaliya tahay) uu yahay mid iska dhaga tiraayo qeybtii muhiimka ahayd ee aay bulshada ku lahayd. Dhalinyaradaasi waxaay ku doodeen in sidii aay shaqaaqooyinkii dhacayba ugu qaybqaatenn, aay sidoo kale dhismaha qarankana qayb firfircoon uga qaadan karaan. Waxaay xuseen Somali Youth League (SYL) oo ka koobnaa sadex iyo toban dhalanyaro kuwaas oo Soomaaliya Xuriyad u horseeday. Dhanka isku biiridda Hiiraan iyo SDH, dumarka un baa hadal laàan soo dhaweeyay. Qaar baa waxaay la yaabeen sababta loogu deg degaaya sameynta DawladGoboled kale, ayadoo sadexdii dhawaan la sameeyay aay amaan daradi kasii dartay.

- *"Timirtii horeba dab loo waa".*[22]

Kuwa kale ayaa waxaay ku doodeen in SDH aay nabdoontahay halka aay Hiiraan amaandarri ka jirto, ayagoo muujiyay cabsida aay ka qabaan in aay amaandarridaasi xagooda u soo gudubto. Isku biiridda ayaa ayaduna lagu gacansayray, ayadoo loo arkay "*mid aay Itoobiya wadato, oo aay Itoobiya leedahay*" nidaam uusan qof Soomaali ah hogaanka u haaynin. In badan oo kooxaha ka mid ah ayaa waxaay ku soo celceliyeen, in aay labada Gobol wax ikhtiyaar ahba lahayn. Sababtu waa xaqiiqada ah in SDH iyo Hiiraan aay yihiin labada deegaan ee kali ah oo aan weli DawladGoboleed kale ku biirin. waxaa kale oo jiray qaar midowga shuruud ku xiray:

- *"Waan ogolnahay (reer SDH) in aan Hiraan la midowno haddii aay ogolaadaan in aan annaga magaala madaxda DawladGoboleedka qaadano"*

Waxaay inta badan la tahay in aay Federaal iyo Dhaqanka Soomaaliyeed is qaadan karaan, ayadoo tiro aan badnayn (oo ka qeybgalayaasha ka mid ah) aay la tahay, in xudduudaha federaalka uu noolasha ree guuraagacarqaladeyndoono.

[21] Mustafa Sheikh Elmi waa abwaan Soomaaliyeed oo caan ah, gabyaa, heesaa, wuxuu Shirkii carta ee sanadki 2000 ka heesayÖ *"Mar un madaxweeyna I dhaha"* asagoo dadka ku baraarujinaayay sida ayy Soomaali badan madaxtinimada u dooneyso.

[22] Waa sheeka Soomaaliyeed. Waxaa la sheegay in nin uu mid aay saaxibo ahaayeen uu timir u keenay. Ninka timirta loo keenay, horay ayuu timir u haystay (laakin ma uusan cunin maadaama uu u haystay in timirtu tahay wax la kariyo), sidaa darteed markii uu saaxibkii timirta u keenay ayuu wuxuu ku yiri: "*timirtii horeba dab loo waa*".

b. Maamul Hoose

Degmadu waxaay leedahay Gole-Deegaan oo aa WAGF 2015 u soo magacaawday. Intaan sugidda amaanka ka ahayn, ma jiraan wax adeeg bulshadeed ah oo uu bixiyo maamulka degmada. Ka qeybgalayaasha waxaay sheegeen, inuu jiro shir usbuucla ah oo aay Maamulka Degmad iyo dhamaan inta aay khuseysaba si xur ah fikradahooda ugu muujiyaan.

c. Xallinta Khilaafaadka

Kooxaha oo dhan waxaay sheegeen, in aa jireen dagaallo boqolsano jirsaday oo u dhaxeeyay Illi iyo Mataan oo labadaba xubin ka ah beesha Abgaal. Dagaalkaas waxaa ugu dambeystii xalliyay Odayaasha Dhaqanka iyo Maamulka Deegaanka. Dagaalladaas waxaa sababay arimma isir iyo xudduud ku saabsan, ayadoo arinta ugu weyn ee uu ka kacay aay ahayd, fulin laàanta Heshiisyadii Beelaha ee 2000.

Kooxaha oo dhan war fiican ayaay AMISOM ka sheegeen. Waxaa si guud loogu mahadnaqay adeega xaruunta caafimaad ee AMISOM, ayadoo isla mar ahaantaas carrabka lagu adkeeyay in aaysan badal u noqoneynin ciidan qaran oo Soomaaliyeed.

<u>Degmooyinka al-Shabaab hoos yimaada</u>

Howlgalka wuxuu un fursad u helay in uu wareysto xubno uu Jowhar kula kulmay oo ka yimid labada degmo ee aay al-Shabaab maamusho.

6) Aadan Yaabaal

Degmadaan waxaa ka talisa al-Shabaab, maamulkii degmadana musaafiris ayuu ku maqanyahay. Markii ugu horeysay oo aay ka qeybgalayaasha Federaal maqlaan waa doorashadii Madaxweyna Hassan Sheikh, ayadoo qaar aay dàdoodu weyntahay sheegeen in aay markii ugu horeysay oo aay ereyga Federaalmaqlaan aay lixdamaadkii ahayd. "*Federaal waa wax la wadaagay*" ayaay qaar yiraahdeen, ayadooy aay koox kalena sidaa oo kale ku tilmaantay inuu yahay deegaano isku darsamay si aay DawladGoboleed u sameystaan. Wadamada Federaalka ah oo aay kooxdu taqaano waa Ruushka iyo Itoobiya. Badankoodu waxaay yiraahdeen, maadaama aay Soomaalidu dad isku mid ah yihiin, Federaalku ma aha mid anfacaaya. Si kastaba ha ahaatee, waxaay gacma furan ku soo dhaweynayaan midowga Hiiraan iyo SDH. Ma jiraan wax dagaal beeleed ah oo degmada ka socdo ayadoo aay al-Shabaab wax dagaal qabiil ah u dulqaadanin. Kooxda (ka qeybgalayaasha) waxaay aaminsanyihiin in AMISOM aay daacad ka ahayn nabadda Soomaaliya, laakin aay rabaan inaay un aruursadaan doolar aay waddankoodu ku heleynin.

7) Ruun-Nirgood

Sida Aadan Yaabaal, Ruun-Nirgood waxaay weli ku jirtaa gacanta al-shabaab. Ka qeybgalayaasha waxaay markii ugu horeysay Federaal maqleen wakhtigii shirkii dib u heshiisiinta ee Mbagathi. Waxaay ku magacaabeen dadaal uu deegaan walbo iskii isu abaabulaayo si uu horumar u gaaro. Wadamada Federaalka ah oo aay kooxdu taqaanay waxaa ka mid ah: Itoobiya, Jarmalka iyo Ameerika. Kooxda waxaay qireen in wadamadaani laga baran karo casharro ku saabsan, dawlad-wanaag, nabad iyo amaan.

Mit ka qeybgalayaasha ka mid ah ayaa wuxuu faahfaahiyay sida Federaalka iyo dhaqanka Soomaaliyeed aay isu qaadan karaan markii dhinaca xudduudaha laga fiiriyo. Wuxuu yiri, dhaqan ahaan laba walxood ayaa qeexa xudduudaha beelaha, dhaqdhaqaaqa xoolaha iyo dadka. Labadaas walxood waa *Jaha* iyo *Jir-Jir*. Federaalkuna, ayuu yiri ka qeybgalahaan, labadaan erey ee *Jaha* iyo *Jir-Jir*aya la adeegsanayaa si loo qeexo xudduudaha beelaha iyo xiriirrada. Sidaa aawgeeg ma arko in xudduudaha federaalka aay wax dhib ah keenyaan. Inta badan waay isku ogolaadeen, lakin in yar ayaay la tahay in Federaal uusan Soomaaliya ka dhaqan galikarin sababtoo ah Soomaalidu waa dad isku mid ah.

Isku biiridda Hiiraan iyo SDH kuligood waay soo dhaweeyeen. Wax dagaallo ah oo degmada ka socday ma lahayn sababtoo ah al-Shabaab ayaa xukunto. AMISOM waxaay ku sheegeen in aay yihiin kuwo wax ma tarayaal ah oo lacag balaash ah iska qaato.

Isu diyaarinti Shirarha

Halbowlaha mashruuca waa SHIRARKA 2016 dhicidoona. Ayadoo la adeegsanaaya hab dhaqameedka wadahadalka oo aay Soomaalida caanka ku tahay ee loo yaqano "*geed qurac ah hoostiis*," ayaa waxaa isugu imaanidoono xubno ka socodo degmooyinka uu Gobolku leeyahay. Shirarkaas oo aay sidoo kale GudoomiyayaashaDegmooyinka ka qeybgalayaan, ayaawaxaay isla falanqeyndoonaan fikradahooda, rabitaankooda, rajooyinkooda iyo sida aay filayaan in mustaqbalka uu Maamullada iyo Dawladaha Hoose ee Soomaaliya u ekaado. Kadib hordhac gaaban oo aay kooxda qiiymaynta jeedin doonto, waxaa bilaaban doono wadahadallo furan oo aay ka qeybgalayaasha yeelan doonaan.Si kastaba ha ahaatee, maadaama Gudoomiyayaasha Degmooyinka aay ka qaybgalidoonaan aqoon is weydaarsiga kobcinta tayyada ee December 2015, waxaay awood u yeelandoonaan in aay ka caawiyaan ka gudbidda fahanka qaldan iyo fikradaha kala duwan, kuwaas oo laga yaabo in aay mugdi geliyaan muhimmadii asalka ahayd ee dhismaha qaran Soomaaliyeed: Federaal, Dawlad Hoose iyo Xallinta Khilaafaadka.

Ku Biiridda Hiiraan

Marki laga reebo deegaanka Banaadir, oo inta badan lagu tiriyo Muqdisho, SDH iyo Hiiraan oo keli ah un baan weli isku biirin si aay u yeeshaan maamul hoosaad u horseeda dhismaha Dawlad Goboleed cusuban. Hase yeeshee, ka dib markii uu cadaadis caalamka uga yimid,ayadoo uu matalaayo Ergayga Gaarka ah ee Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay (EGXGQM), ayaa waxaa bilawday wadahadaladii midowga SDH iyo Hiiraan.

Inta howlgakaan qiimeenta ah ee SDH lagu guda jiray, waxaa kooxda Berghof Foundation goob kasta oo aay tagaan loogu sheegaay in aay tahay markii taariikhda ugu horeysay ee dadka la weydiiyo, rajadooda, rabitaankooda, aragtidooda iyo waxaay doorbidayaan oo ku saabsan dhismaha qaran. Waxaa la muujiyay cabsida laga qabo in wadahadalada SDH iyo Hiiraan la qasbo ka hor inta aaysan dadka fursad u helin in aay SHIRARKA ràyigooda ka jeediyaan. Maamulka deegaanka SDH ayaa wuxuu kooxda Berghof Foundation weydiistay in uu ka taageero wadahadallada aay Hiiraan la galayaan. Kooxda Berghof Foundation waxaay xiriir la sameeyeen Gudoomiyaha Gobolka Hiiran. Goàmada ku saabsan habka arintaan muhiimka ah halkaan horay looga sii dhaqaajinaayo, weli way laalantahay oo waxaay ku xirantahay in dhamaan dadka xiiseeyolalasii hadlo, kuwaasoo aay Deeqbixiyayaasha ka mid yihiin.

Natiijooyinka guud iyo Talooyin

a. Nidaamka Federaalka

Waxaa guud ahaan jira is maandhaaf iyo fahan qaldan oo ku saabsan Federaal wuxuu yahay iyo sida inuu ahaado aay tahay. Intii lagu guda jiray wareysiyadaan uu howlgalkaan qiimeynta ah ka fuliyay degmooyinka SDH oo dhan, waxaa cadaatay in uusan jirin isku day dadka loogu sharaxaayay dhismahaan dastuuriga ah. Sidaa aawgeed, jawaabaha waxaay u kala duwanaayeen mid dhaha: “Federaal Quràanka ayuu la jaanqaadiyaa”, iyo mid yiraahdo“Federaal wuxuu noo keenayaa Khaniisnimo”. Guud ahaan, waxaay kooxda qiimaynta la tahay in hadii fahanka qaldan laga saaro (oo si sax ah loo fahmo), uu Federaalka taageerada shacabka helilahaa. Sidaa darteed, waxaa loo baahanyahay in lala tacaalo qaladka Federaalka laga haysto, iyo sida uu ugu dambeyntii waddan Federaal ah u ekaankaro. Tubtaas uun bay bulshadu ku gaari kartaa goàamo aay Federaalka ku taageereyso amaba ku diideyso.

Sida ku xusan warbixintaan, halbowlaha mashruucaan waa *Shirarka* saddexda ah. Shirarkaan waxaa lagu casuumayaa dad degmooyinka ka kala socdaan. Ayagoo ku saleynayaan waayo aragnimada aay ka heleen markaay qiimaynta deegaanka sameynayeen, ayaa kooxda waxaay ku talineysaa in gaar ahaan Dumarka iyo Abwaanada si weyn Shirarka ugu lu yeeshaan, maxaa yeelay waa kuwa ugu fiican ee hirgelin karo arimaha mowdhucaan ku xeeran. Ayadoy dumarku hab suuqgeyn oo u gaar ah leeyihiin, ayaa gabayganawuxuu dhaqanka Soomaaliyeed ku leeyahay door aad muhiim u ah. Gabaykooban, gaar ahaan kann leh qaabka lasoo kokoobay oo “*Shirib*” loo yaqaano ayaa la arkaa in uu ka saameeyn badan yahay Shirar iyo muxaadharooyin.

b. Maamul Hoose

Maamullada Hoose waxaay u egyihiin kuwo xaaladbillow ah ku jiro. Waxaa meelo qaar laga hirgaliyay dhismaha Maamul Hoose, lakin maamuladaan waxaay, hadiiba laga helo, bixiyaan adeegyaassasi ah. Lakin maamul hoose waa shey muhiim u ah heerarka Dawladeed ee uu dhan kastaba nidaamka Federaalka ah leeyahay. Maamulka hoose waa in dhismaha guud ee

Dawladda lagu kaamilaa, ayadoo isla mar ahaantaa lasiinaaya baaxad ku filan oo uu ku maareeyn karo arimaha deegaamada asaga u gaarka ah. Caqabadaha waxaa ka mid ah, doorka odayaasha dhaqanka iyo hogaamiyaasha diinta, iyo xiriirka aay la yeelanayaan saraakiisha la soo doorto ee ka tirsan maamulka hoose; iyo sidoo kale, sidii looga gudbi lahaa is burrinta dhex taalo Qaran Dawladnimo ku saleysan iyo mid qabiil saldhigiisu yahay, ayadoo mid kastaba uu sharciyad gooni ah leeyahay, laakiin aay leeyihiin dhismo awoodeed oo isku maran. Waa in aay furnaadaan fursadaha wadahadalka ee u dhaxeeyo Maamullada Hoose iyo heerarka dhismahaDawladnimo ee sare si loo meel mariyo dawlad wax qabad leh. Dawladaha Hoose waa in aay dhiirigeliyaan ka qayb qaadashada dadweynaha oo aay sameyaan maamul xirfadeysan.

c. Xallinta Khilaafaadka

Waxaay u muuqataa in deegaanada aay wax colaad ah ka jirin, yihiin kuwa aay al-Shabaab xukumaan. Lakin nabaddaani ma aha mid ku timaaday is qancin ama ka dhaadhicin, balse ku timid qasab iyo digniin xad dhaaf ah oo aan munaasab ahayn. Waxaa cad in xalka noocaan ah uusan ahayn kann uu shacabka codsanaaya ama uu rabo. Mashruucaan wuxuu diiradda saaridoonaa xallinta khilaafaadka, ee beri dhaweed la isticmaalay, ayadoo loo maraayo xeerka dhaqanka, odayaasha iyo culamada, ayadoo weliba lasoo bandhigaayo aragtiyo kale oo ku aadan xallinta khilaafaadka.

Waxaay u muuqataa inaay jiraan dhibaatooyin soo noqnoqday oo lagu tilmaami karo in aay yihiin caqabada hor taagan in colaadaha xal waara laga gaaro. Fashilaada inta badan ku timaada in colaadaha si kama dambeys ah loo xalliyo waa dhaqaalo laàan: “Culamada oo taageero ka helaayo hayàdaha maxalliga ah ayaa isku dayay in aay colaadda xal u helaan, hase yeeshee, dib u heshiisiinti dhexda ayaay ku burburtay sababo dhaqaale iyo kuwa farsamo aawadood”.[23] Marar badan, waxaay dhibaatada ka jirtaa ayadoo isku dayga xallinta colaadahayahay midmuddo gaaban lagu saleeyo, isla markaana aay ka maranyihiin aragti fog iyo dhaqaalihii lagu meel marin lahaay. Hadii si kale loo yiraahdo, dexdexaadiyayaashu waxaay ku farxaan is gacanqaadidda qeybihii dagaalamay, ayadoonan jirin wax balanqaad ah oo ku aadan in aay isla dhibaatadii mustaqbalka dhow soo laaban doonin.

Mashruuca “Dismaha hannaan Doowladnimo ee Federalka ah,

Ayadoo loo maraayo Wadahadalka Maamullada Hoose”

Waxaa maalgeliyay Dawlada Jarmalka ee Federaalka ah, Xafiiska Arimaha Dibadda, Baarlin, Jarmalka

Hayàdda Berghof Foundation, Altensteinstr. 48a D-14195 Berlin, Jarmalka

www.berhof-foundation.org

Agaasimaha Guud:	**Prof. Dr. Hajo Giessmann iyo Ms. Sandra Pfahler**
Maamulaha Mashruuca:	**Ms. Janel B. Galvanek**
Sarkaal Sare ee Farsamada:	**Mr. Abdi Noor Mohamed**
Lataliya Sare:	**Dr. Christoph Jaeger**

[23] SOMALI CEWERU; Conflict Early Warning Early Response Unit, draft report *From the bottom-up: Perspectives through Conflict Analysis and key Political Actors`Maping for the Central Region of Hiran, Galgaduud and Middle Shabelle, February 2013, p. 47.*

Lifaaqa 1aad

Xubnaha Kooxda Berghof Foundation ee Howlgalka Qiimaynta waa sida soo socota:

Mr. Abdi Noor Mohamed	Berghof Foundation, Sarkaal Sare ee Farsamada mashruuca Soomaaliya iyo madaxa kooxda
Ms. Umusacdo Bashir Nour	Bare the Puntland State University, Garowe
Mr. Abdihamid Hassan Wehlie	Hormuud, Kulliyadda Dhaqaalaha iyo Culuunta Bulshada SIMAD University, Mogadishu
Mr. Ali Mohamed Yusuf	Cilmi Baare, University of Southern Somalia, Baidoa
Mr. Abdirizaq Omar Bod Dhaxe	La taliya Sarem, Guddomiyaha Gobolka Shabeelada
Mr. Sharif Abukar Ahmed	Guddoomiye Degmo oo hore, iyo la taliye Gudoomiyaha Gobolka Shabeelada Dhaxe

Lifaaqa 2aad

Sheekooyinka Xallinta Khilaafaadka ee Shabeelada Dhaxe, Soomaaliya

Sheekada koobaad

Waxaa jiray qof beesha Abgaal ka tirsanaa oo lahaa Hayàd maxalli ah. Hayàddiibaa waxaay qandaraas ka hesha jiha caalami ah si aay u qoddo Ceelal iyo Kanaalo wabi Shabeele jiinkiisa ku teedsan. Maalin maalmaha ka mid ah, ayadoo aay shaqaalihii Hayàdda Kanaal qodayaan, ayaa waxaa u yimid nin dhalinyar ah oo hubeysan oo beel kale oo isla Abgaalka ah ka soo jeedo, asagoo shaqaalihii waydiiya in aay lacag siiyaan. Shaqaalihii waxaay ugu jawaabeen, lacag ma haysanno, ka dibna dagaal ayaa dhacay. Shaqaalaha Hayàdda waxaa la jiray labo ilaaliye oo hubeysan. Intii uu dagaalka socday ayaa ninkii dhalinyarta ahaa lugta laga dhaawacay. Intii dhakhtarka loo sii waday ayuu dhiig baxay, wuuna geeriyooday. Jilibki uu ninkii dhintay ka dhashay ayaa intaay dagaal aargoosi ah soo qaadeen waxaay dileen afar nin oo jilibka kale ka tirsan oo uu ku jiro nin taajir caan ah oo la dhashay ninka Hayàdda iska lahaa. Dagaaladii aargoosiga ahaa ayaa waxaay deegaanka ka socdeen muddo sanad ah. Muddo sanad ah ka dib waxaay tirada dhimashada gaareysay 40 ruux. Colaadu waxaay saameysay inta badan deegaanada SDH iyo Muqdishodabayaaqadiisanadki1990.

Wiil dhalinyar ah oo kasoo jeedo beel beelihii diriraayay ka mid ah ayaa wuxuudilay wiil kale oo uu dhalay nin sarkaalsare Militariga Soomaaliya ka ahaa. Maalintii aaska, ayaa koox dhalinyaro mutacalimiin ah oo 40 qof ka kooban, oo ka soo jeeda beeshii wiilka la aasaayay dishay, ayaa waxaay guàansadeen in aay dagaalkaan soo afjaraan. Waxaayna aadeen halkii aay duugta ka socotay. Beeshii laga dhintay, markaay arkeen dhalinyaradaan ku soo socoto waay fajaceen. Qaar ayaa waxaay intii kale u sheegeen in aay is dejiyaan oo aay ka war sugaayn waxa aay dalinyartaan la yimaadaan. Markaay yimaadeen, dhalinyartii waxaay yiraahdeen “Sidaan kuma sii noolaan karno. Waa ceeb anogoo walaalo ah in aan is laayno. Colaadaan aan joojino. Ama haddaba na laaya ama aan heshiino”. Beeshii laga dhintay waxaay ogolaatay soo jeedintii nabadda, ayadoo aay si shucuur ku dheehantay labadii beeloodba meydki isula aaseen. Ka dibna waxaay labadi dhinacba u guda galeen in aay qaaraan uruuriyaan ayagoo xubno isku dhaf ah aay tuulooyinka illaa baadiyaha fog ku soo wareegeen si aay colaada u damiyaan dadkooduna nabadda la qaatay u gaarsiiyaan. Kooxdii nabadda waday waxaay ka koobnaayeen dhalinyaro kali ah. Odayaasha looma ogoleen in aay shirarka ka qeybqaataan, ayadoo maal qabeenada waaweyn laga diiday lacaga aay soo dhiibeen. Inta aay shirarka socdeen lama ogoleen in sawirro laqaado ama video la duubo, si aan la isu dhihin dhalinyartu waxaay shirarkaan nabadda ah u wadaan in aay Hayàda ajnabi ah lacag uga qaataan. Markaay dhalinyaradii labada beelood safarradoodii nabadda ee baadiyaha soo afjareen, deegaanki oo idil nabad ayuu noqday.

Kadib muddo bil ah oo la nabdoonaa ayaa waxaa uu dagaal dex maray laba wiil oo ka tirsanaa labaddi beelood ee aay horay dirirtu u dhexmartay. Midkood ayaa kii kale middi geliyay oo sidaas ku dilay. Willka dambiilaha ah wuxuu ka soo jeeday beeshii uu ka dhashay ninkii wiilkii ugu horeeyay oo aay dirirtaba ka bilaabatay toogtay. Lakin markaani, ma dhicin wax dil aargoosi ah, ayadoo aay beeluhu nabadda ilaaliyeen. Waxaay isla goàamiyeen in arintaani aay ku koobantahay dirir labo wiil dhex martay, ooysan ahayn dirir laba beelood dhexmartay.

Sheekada labaad

Waxaa Balcad degenaa nin qabyaaladda necbaa; oo aanan aaminsaneen. Maadaama uusan qabiilba aaminsaneen, ayaa beeshiisii aay asaga iyo qoyskiisiba dayacday, oo kaligood ayaa meel gooni ah deganaa. Beeshiisu ma aaysan difaaceynin asaguna ayaga waxba kuma uusan taageeri jirin. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa wiil uu dhalay wuxuu dilay nin beel kale ka dhashay. Marka uu falkaan dilka ah dhacaayay, ninkaan iyo beeshiisu wax xiriix is kaashi ah kama dhaxeynin, wuuna ogaa in uusan wax taageero ah ka heleynin. Masùuliyad wadareedkii difaaca beesha ee uu dhaqanku caadada u lahaa asaga dibadduu ka ahaa. Waxaa la gudbonaaday labo mid: in uu cararo oo uu degaanka ka guuro, ama in uu si degdeg ah xal u raadiyo.

Wiilkiisi ayuu intuu u yeeray wuxuu ku yiri: “Wiilkeygiyow nin baad dishay”. Ka dibna gacmaha iyo lugaha ayuu ka xirxiray oo uu weliba sidii maydki u siixiyay. Markaasuu intuu laba gò oo cad cad keenay ayuu mid wiilkiisa karfan ahaan ugu duuduubay, asgoo kii kalena horay usoo qaatay si ninkii dhintay loogu karfaniyo. Wuxuu kaloo horay usoo kaxeeyay laba rati si munaasabadda aaska wiilkiisa iyo ninkii uu dilay loogu qalo. Wiilkiisi (oo uu xirxiray) iyo labadi neef oo geela ahaa aya wuxuu u geeyay reerkii ninka laga dilay, asagoo ku yiri: waa kann wiilkeygii gardaroolihii waan keenay. Wiilki ayuuna beeshi ninka laga dila gacanta u geliyay, asagoo geelina siiyay si aay aaska labada nin ugu qashaan. Beeshi ninka laga dilay, arinti ayaa falanqeeyeen. Wadahadallo dheer ka dib, waxaay udaygii u sheegeen in aay nafta wiilkiisa badbaadinayaan, oo aaysan weliba wax aargoosi ah ku kici doonin. Labadi neef oo geela ahaana si wada jir ah ayaay meeshi ugu qasheen.

Odaygi markii uu gurigiisi kusoo laabtay, beeshiisi waayba ka warqabeen habka cajiibka ah ee uu arinti si nabad ah ugu xalliyay. Beeshiisi oo awal hore gooyeen, ayaa hadda waxaay dib u qiimeeyeen xariifnimadiisa ayagoo u magacaabay NABADOON.

Sheekada Saddexaad

Laba beelood oo ka mid ah beelaha Cadale dego, ayaa muddo dheer diriraayay ayagoo ku gacanseyreen isku day kasta oo lagu dexdexaadin rabay. Kadib markii aay dagaaladii daba dheeraadeen, ayaay culamadii soo kala dhexgaleen maadaama aay odayaashi colaada joojin kari waayeen. Culamadi waxaay ku heshiiyeen in aay bulshadii cunaqabateyn ku soo rogaan. Cunaqabateyntaas waxaa ka mid ahaa, inaay joojiyeen qabashada munaasabadaha nikaaxa, aaska iyo inaay xireen madaaristi. Beelihi oo murugeysan ayaa waxaay culamadi ka baryeen in aay goàankooda ka laabtaan laakin culamadii taas waay ka diideen. Iskooladii waa la xiray masaajiddii waa la jooji in salaada lagu oogo. Ka dibna dadkii ayaa waxaay arkeen in aay sharku soo socoto maadaama xirriki ayaga iyo culumada u dhaxeeyay uu goày oo aay adeegyadiina joojiyeen. Cuna qabateynti waxaay labadi beelood oo diriraayay ku qasabtay in aay geedka wadahadalka isugu yimaadaan. Culumadii ayaa markaasi gudagalay inaay dhexdhexaadiyaan.